Nationwide Children's
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ *Health Education for Patients and Families*

# Nidaam lagu ogaado laguna daaweeyo dhibaatooyinka ku dhaca qeybta sare ee marinka caloosha iyo mindhicirka iyadoo la Isticmaalayo Suuxinta guud

## Upper Endoscopy with General Anesthesia (Somali)

Waa qaab loo isticmaalo in lagu eego gudaha marinka cuntada, dhuunta, iyo caloosha iyo malawadka (Sawirka 1). Dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadku wuxuu isticmaali doonaa tuubbo yar oo laaban (dabacsan) oo la yiraahdo oo la yiraahdo tijaabo lagu hubiyo gudaha jidhkaaga si loo eego casaan, barar, dhiigbax, boogaha, ama caabuqyada.




**Sawirka 1**-aad hungurigu wuxuu cuntada la ruugo geeyaa caloosha.

### Ka hor Habraaca

- Wac dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka haddii ay xanuunsadaan ka hor inta aan la sameyn baaritaanka lagu hubiyo gudaha jidhka. Waxa laga yaabaa in loo baahdo in dib loo dhigo.
- Kalkaalisada ayaa ku soo wici doonta si ay su'aalo kaaga waydiiso caafimaad ee cunugaaga.
- Kalkaalisada waxay kuu sheegi doontaa xiliga ay tahay inaad cunugaaga ka joojiso cuntada iyo cabitaanada, marka aad isbitaalka keeneyso iyo waqtiga qaliinka.


©1979, La muraajacay 2024, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

- Ilmahaaga ha u oggolaan in uu cuno caano-caano, cabitaanada qufaca, ama nacnac adag. Haddii cunugaagu uu soo calaalijirey xanjo, waxaa qaliinka dib loo dhigi doonaa 2 saacadood laga bilaabo wakhtiga uu xanjada tufay. Haddii la liqay xanjada, qaliinka waxaa dib loo dhigi doonaa 8 saacadood laga bilaabo xiligii uu xanjada laqay.

## Maalinta Habraaca

- Waalidka ama qofka masuul ka ah waa in uu goobta joogo si uu u siiyo macluumaadka la xiriira caafimaadka ilmaha uuna u saxiixo foomka ogolaanshaha. Haddii aysan imaan karin, wac waaxda GI si aad u sameyso qorshe kale.
- Ilmahaaga waxaad u diiwaangelinaysaa sida laguu sheegay. Kalkaaliyayaasha ayaa ka hadli doona qaliinka ilmahaaga iyo wixii cabasho oo khuseya caafimaadka.
- Ilmahaada waxaa dib loogu soo celin doonaa qaliin inta aad ku sugeysid qolka sugitaanka. Qolka qaliinka waxaa lagu siinayaa dawooyin kaa caawinaya hurdada (dawada hurdada). Tan waxaa laga siin doona xididka ama gaas ahan si aad u neefsato.
- Ilmahaagu wuxuu ku jiifsanayaa dhabarka ama dhinaca, kaddibna indho-indheynta waxaa la geliyaa afkiisa. Dhakhtarka ama daryeel bixiyaha caafimaadku wuxuu kugu hagaajiyaa habka aad dhuunta, iyo ugala caloosha iyo malawadka.
- Qaybo yaryar oo unugyo ah (unugo yar) ayaa laga yaabaa in la qaado si loo baadho.
- Caadi ahaan qaliinku wuxuu qaataa 15 illaa 20 daqiiqo.

## Ka dib Qalliinka

- Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu qabo baahiyo gaar ah. Marka ay si fiican u xakameeyaan dareeraha, waxay cuni karaan cunto.
- Waxaa laga yaabaa in uu cunugaagu u baahdo in lagaa caawiyo socodka iyo in uu gaaro gaariga.
- Dhakhtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ayaa kuu sheegi doona waqtiga uu cunugaagu dib ugu laaban karo hawlihiisa caadiga ah.

## Khataraha

- **Dhiigbax**
  - Dhiig yar ayaa ka imaanaya meesha lagaa qaley.
  - Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu dhiig ku jiro candhuuftiisa. Tani waa khatar haddii ilmahaagu uu leeyahay xanuun dhiig-baxa.

- Si taxadar leh u ilaali ilmahaaga. Waa inaysan dhiig bixin muddo dheer.

- **Neefsasho** – Marka cuntada ama dareeraha la neefsado (la neefsado) habka neefsashada halkii ay u liqi lahaayeen oo ay ka soo gudbi lahaayeen marinka cuntada.
  - Tani waxay dhici kartaa haddii ilmahaagu wax cuno ama cabbo ka hor inta aan la sameyn qaliinka. Raac tilmaamaha cuntada iyo cabitaanka si aad uga hortagto in aad neefsatid.
  - Haddii neefsashada ay dhacdo, ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu ku dhaco hargab.
- **Daloolka** – Kani waa god ku yaalla caloosha, marinka cuntada laga cuno ama malawadka. Waa wax aad dhif u ah. Qalliin ayaa loo baahan karaa si loo hagaajiyo.
- **Xirinka malawadka** – Malawadka wuxuu leeyhay xanibad.
  - Tani waxay dhici kartaa haddii uu jiro nabar weyn oo ku yaalla goobta qalinka.
  - Tani waxay u badan tahay in ay dhacdo haddii ilmahaagu uu halis ugu jiro in uu dhiig badan (aad u badan) ka baxo.

## Goorta ay tahay in la Waco Dhakhtarka

Soo wac dhaqtarka canugaaga ama daryeel bixiyaha caafimaadka haddii ay qabaan:

- Ku dhibtoodo neefsashada.
- Waqti adagtahay in la soo toosiyo.
- Xanuun degdeg ah, oo caloosha ku dhaca.
- Xabeeb oo soconaysa in ka badan 24 saacadood.
- Qandho ka sarreysa 102.5º Fahrenheit (F) ama 39.2º Celsius (C).
- Mataqid (matag).

## Lasocodka

Waxaad heli doontaa wicitaan haddii qorshaha daryeelka ilmahaaga loo baahan yahay in la beddelo. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, waydii dhakhtarka cunugaaga ama daryeel bixiyaha caafimaadka.